



Berito (Tallaado, Febraayo 16): Korontada oo Maqan Awgeed Iskuuladu Way Xiran Yihii Korontada, Sidoo Kale Waa La Baajiyey Waxbarashadii Ardaydu Guryaha Ku Qaadanayeen

Febraayo 15, 2021

Qoysaska Qaaliga ee PPS,

Korontadii oo maqan awgeed iyada ay sababtay barafkii da'ayey dhowrkii maalmood ee aan soo dhaafnay, suurtgal maaha inaanu siino Waxbarashadii Ardaydu Guryaha Ku Qaadanayeen, Tallaado oo bishu tahay 16, 2021. Dhammaan dhismayaasha iskuuladu waa ay xidhnaan doonaan.

Inta ay **dhismayaasha iskuulada** PPS ay **xiran yihii berito waa la baajiyey Waxbarashadii Ardaydu Guryaha Ku Qaadanayeen** (Tallaado, Febraayo 16):

- Dhammaan hawlihii **Waxbarashada Koobneyd ee Ardayda La Siiyo (LIPI)** waa la **baajiyey berito**.
- **Goobihii SUN ee cuntada lagu qaybinayey** waa xiranaan doonaan.
- **Xannaanadii Caruurta dhismayaasha PPS** waa la **baajiyey berito**.
- **Tababaradii ciyaaraha ardayda** dugsiyada degmada waa la **baajiyey berito**.
- **Casharadii ardayda guryaha loogu geynayey** waa la **baajiyey berito**.
- Dhammaan **hawlihii kale ee ku salaysnaa iskuulada** waa la **baajiyey berito**.

Waqtigan xaadirka ah, waxa aan rajeyneynaa inaan cuntadii sidi caadiga ahayd u bixineyno goobihii laga bixin jiray maalinta Arbacada ah. Ardayda u baahan **inay helaan cuntada berito**, fadlan waxaad kala xiriirtaa [Oregon Food Bank Food Finder](#). Qolyaha u baahan inay **hoy ay galaan raba**, waxaad ka fiirisaan [Multnomah County options](#) ama waxaad wacdaa telefoonka 211.

Waad mahadsan tiihin waxaan idiin rajeyneynaa nabadgelyo.